



US Army Corps
of Engineers®

Daraasadaha Kayndaabka & Dhaamka Twin Cities

DHISMAHA XOOGA®

Hordhac

Si loo fududeeyo socodka ganacsi ee biyaha (maraakiibta iyo doonyaha wax jiida), Kongeresku waxa amray in la dhiso Dekada iyo Dhaamka 1917, Lower St. Anthony Falls Lock and Dam 1956 iyo Upper St. Anthony Falls 1963. Injineerada Ciidanka Maraykanku waxay dhiseen sadexdan mashruuc ee dakad oo waxay gacanka ku hayeen oo ay maamulayeen ilaa maanta.

2014, Kongeresku waxa uu amray in Upper St. Anthony Falls in lagu xidho mudo hal sano ah. Juun 2015, Injineerada Ciidanku waxay joojiyeen shaqadii dakada ee Dakada iyo Dhaamka Upper St. Anthony Falls, taas oo joojisay socsodkii St. Anthony Falls.

Sharaxa Daraasada

Ujeedada daraasadan waxaa weeye in lagu ogaado hadii ay jirto dan federal ah oo sii wadida lahaanshaha iyo ka shaqaynta dakada iyo dhaamka.

Hadii ayna jirin dan federal ah oo jirtaa, Ciidanka waxaa looga fadhiyaa inay sheegaan qaab kale oo ay isku dhaafin karaan. **Is dhaafintu waxay ka dhigan tahay inay dakada iyo dhaamka ay ka wareejinayaan mulkiyada federalka oo ay ku wareejinayaan deegaanka, gobolka, iyo hay'ada federalka ah.**

Kahor inta ayna wareejin dakada iyo dhaamka, Kongeresku waxaa loo baahan yahay in ogolaanshaha uu kala noqdo, taas oo soo afjaraysa shaqada socodka Minneapolis.

2016, Ciidanku waxa uu bilaabay daraasada wareejiyenka sadex dakadood iyo dhaamam Minneapolis ah. 2018, Ciidanka waxaa loo sheegey inay kala saaraan daraasada Upper St. Anthony Falls iyo Lower St. Anthony Falls iyo daraasada Dakada iyo Dhaamka 1.



Dakadaha iyo Dhaamamka Wabiga Mississippi ee Twin Cities

Upper St. Anthony Falls

Janaayo 2021, daraasad qabyo qoraal ah oo is dhaafinta ah ee Upper St. Anthony Falls ayaa la baahiyay. Iyada oo laga duulayo amarka Komgereska, dhulka ku xeeran dekada iyo dhaamka waxaa lagu wareejin doonaa magaalada Minneapolis. Warbixinta daraasada qabyo qoraalka ah ee wareejinta waxay ku telinaysaa in inta hadhsan la wareejiyo ee Dekada iyo Dhaamka Upper St. Anthony Falls.

Warbixinta daraasada wareejinta ugu danbaysa iyo talooyinka waxaa la diyaarin doonaa kadib marka la xaqiijiyo dhulalka si loogu wareejiyo magaalada Minneapolis. Warbixinta waxaa lasoo bandhigi doonaa si furan oo waxaa lagu baahin doonaa websaytka Degmada St. Paul.

QAYBTA CIIDANKA MARAYKANKA EE INJINEERADA - WAAXDA MISSISSIPPI VALLEY


ST. PAUL DISTRICT
MVP.USACE.ARMY.MIL



Upper St. Anthony Falls



Lower St. Anthony Falls



Dekada iyo Dhaamka 1

Lower St. Anthony Falls iyo Dekada iyo Dhaamka 1

Daraasad wada jir oo wareejinta Dekada iyo Dhaamka Lower St. Anthony Falls, iyo Dekeada iyo Dhaamka 1 waxay bilaabmi doontaa xagaagan.

Marka daraasadu bilaabanto, kulanka baahinta baaxada shacabka iyo fursadaha macluumaadka shacabka ayaa la wadaagi doonaa. Ka qayb galka hore ee joogtada ah ee kala duwanaanshaha rabitaanka waxa uu bixiyaa macluumaad daruuri ah iyo sawir ikhtiyaarka kale ah.

Daraasado Kale

Ciidanku waxay daraasadayn doonaan isku darka ikhtiyaarada soo socda:

- Wareejin buuxda ama badh
- Waxka badal dekadaha iyo dhaamamka
- Meesha ka saarida dekadaha iyo dhaamamka
- Fursada ay yeelan karaan dekadaga iyo dhaamamku ee loogu adeegsan karo ujeedo cusub oo bay'ada ah

Talada Kongereska, natiijada daraasada wareejinta, lama filanayo inay soo baxdo ilaa 2024. Talada waxaa la xulan doonaa kadib marka dhamaan ikhtiyaarada la wada qiimeeyo.

Meesha Ka Saarida Dhaamka

Ciidanka waxaa loog abaahan yahay inay ku eegaan sidii ay dhaamka meesha uga saari lahaayeen daraasada wareejinta. Wakhtigan lama garanayo hadii meesha ka saarida dhaamku ay dhici doonto; hadii ay samayn doonaan Ciidanku kahor inta aan meesha laga saarin, ama hadii ay sidaa yeeli doonaan mulkiilaha cusub kadib marka lagu wareejiyo.

Qiimaynta Deegaanka

Ciidanku waxay daraasadayn doonaan saamaynta ikhtiyaarada kala duwan ee deegaanka, oo ay ku jiraan qiimaynta saamaynta ka dhalan karta tayada biyaha, kaluunka iyo duurjoogta, taariikhda iyo khayraadka dhaqanka, bulshooyinka deegaanka, jawaab celin, socodka, isbadalka cimilada, deegaanka iyo cadaalada bulshada, iyo diyaarinta tamarta (ayaa kamid ah qaar).



Macluumaad Dheeraad ah ka Oggow



mvp.usace.army.mil/
MplsLocksDisposition



Ka Qayb Gal Kulamo Shacab

Si aad macluumaad uga ogaato munaasabada booqo websaytka Degnada St. Paul ama adiga oo la soconaya jaanaaladeena baraha bulshada.

facebook.com/usace.saintpau
| twitter.com/StPaulUSACE



Nagala Soo Xidhiidh

limeel ugu dir su'aalaha iyo faalooyinka labada daraasadoodba:

[MplsLocksDisposition](https://twitter.com/MplsLocksDisposition)
@ usace.army.mil

QAYBTA CIIDANKA MARAYKANKA EE INJINEERADA - WAAXDA MISSISSIPPI VALLEY
ST. PAUL DISTRICT
MVP.USACE.ARMY.MIL